# CUNTOOYINKA FUDUD EE XISAABTA

## QAAB DHISMEEDKA

- Dulmarka hawlaha & diyaarinta (5-15 daqiiqo)
- Isbarasho (2 daqiiqo)
- Hawl & hadal iswaydaarsi ama wada hadal (20-30 daqiiqado)
- Xiritaanka (5-10 daqiiqo)

## UJEEDOOYINKA

**Dhamaadka hawshan, ka qeybgalayaasha waxay awoodi inay:**

- Ka qaybgalayaashu waxay awood u yeelan doonaan inay aqoonsadaan ama la qabsadaan hawlaha xisaabta si ay ugu habboonaato horumarka ilmahooda.

## WAQTI 40-60 MINUTES

Nashqaddan, waalidiintu waxay ka wada hadlaan "cuntooyinka fudud ee xisaabta" (DREME) waxayna doortaan kuwa ugu habboon jadwalkooda qoys iyo korriinka carruurtooda.

## AALADAHA

Daabacaadda (ama xiriirika digitalka ah) kaadhadhka fudud ee xisaabaadka ee laga helo websaydka xisaabta qoyska DREME https://familymath.stanford.edu/math-snacks/



**HAWLQABAD 3.2**

**Math & Numeracy Lab, University of Minnesota**

© 2025

CUNTOOYINKA FUDUD EE XISAABTA

# IS DIYAARINTA

## QORAALADA QABANQAABIYAHA



## AWOODDA DHISMAHA

Hawshani waxay ku dhisan tahay cutubka **Muujinta Xisaabta Nolol Maalmeedka** laakiin uma baahna dhamaystirka cutubkaas (Cutubka 3aad, Qaybta 1aad)


## ISBEDDELKA

Isticmaal fikradahan si aad wax uga beddesho hawsha ku salaysan:

- Da'da ilmaha
- Waqti iyo agab la heli karo si loo hirgeliyo
- Taageerada waalidiinta

## TALOOYIN

Qoraalka buluuga ahi wuxuu tilmaamayaa in fududeeyayaashu ay oran karaan (tusaale,"Maanta waxaan ka wada hadli doonaa sida ula kac ah oo looga hadlo xisaabta inta lagu jiro hawlaha maalinlaha ah ee ilmahaaga").
Qoraalka caadiga ah ama joogtada ahi waa macluumaadka qabanqaabiyaha.



**HAWLQABAD 3.2**
**Math & Numeracy Lab, University of Minnesota**

© 2025

CUNTOOYINKA FUDUD EE XISAABTA


# IS DIYAARINTA

## DULMARKA HAWLAHA

Hawshan, waalidiintu waxay dib u eegayaan DREME "cuntooyinka fudud ee xisaabta" si ay u helaan fikrado lagu dhex daro lagana hadlo xisaabta nolol maalmeedka qoyska.

## EREYADA MUHIIMKA AH IYO FIKRADAHA

**Ku habboon Korriinka:** La kulanka baahiyaha ilmuhu u qabo si loo kobciyo barashada, koritaanka, iyo horumarka xirfado cusub—iyadoon loo fiirin heerka xirfadaha uu ilmuhu hadda leeyahay. Hawlaha ku habboon da'da ilmaha waa inay bixiyaan caqabado yar, balse waa inaysan noqon kuwo aad u adag ama aad u sahlan(fudud). Xisaabta hore ee ilmaha ku habboon waa inay noqotaa mid ciyaar ku saleysan, lana iska ilaaliyo waraaqaha shaqada (worksheets), haddii uusan ilmuhu si gaar ah u dalbanin inuu sameeyo.



**HAWLQABAD 3.2**

Math & Numeracy Lab, University of Minnesota

© 2025

CUNTOOYINKA FUDUD EE XISAABTA

# IS DIYAARINTA

## DIYAARINTA

### Qaybta 1aad: 10 Daqiiqo

Maadaama, ay hawsha ku saleysantahay da'da carruurta, hubi inaad taqaanid da'da carruurta ee waalid kasta.

Hawshani waxay ku tiirsan tahay DREME Jadwalka Maalinlaha ee Xisaabta Qoyska "Math Snacks". Hawsha ka hor, dib u fiiri "Cusaaso Xisaabeedka" oo dooro kuwa aad jeclaan lahayd in la isticmaalo iyadoo lagu salaynayo kuwa sida aadka ah ula socda baahiyaha waalidiinta kooxdaada. https://familymath.stanford.edu/math-snacks/

Dooro ilaa shan : Cunto fudud oo Xisaab ah" oo ku habboon da'da carruurta qoysaska aad taageerto, si aad u muujiso fikradda waxqabadyada korriinka ku habboon inta lagu jiro wada-hadalka.

Hubi inaad si cad u fahantay weeraha, "horumar ahaan ku habboon," kaas oo loo isticmaalo hawshan. Waxaad xoogga saari doontaa, hawshan, in ilma kasta uu ku horumaro xawligiisa. Markaad dooranayso "Cuntooyinka Fudud ee Xisaabta" inaad isku daydo dibadda, waalidiintu waa inay ka fikiraan danaha ilmaha iyo heerka xirfadda hadda – waa maxay dhaqdhaqaaqyada uu ilmuhu samayn karo, xataa haddii ay u baahan yihiin caawimo yar. Taageerada waalidiinta si ay u doortaan "Cuntooyinka Fudud ee Xisaabta" si ay isugu dayaan carruurtooda kuwaas oo aan aad u adag, ama aad u fudud. Hawlaha bixiya xoogaa caqabado ah ayaa ka caawin doona carruurta inay koraan tooda fekerka xisaabeed. Waxa laga yaabaa inay baranayaan eray cusub oo xisaab ah, ama fikrad xisaab. Mararka qaarkood waalidiintu waxay ogaadaan in ilmahoodu samayn karo wax uu waalidka la filayo ayaa noqon doona mid aad u adag! Xaaladdaas, waalidka waa barashada fikirka xisaabta ilmahooda.





**Math & Numeracy Lab, University of Minnesota**

© 2025

CUNTOOYINKA FUDUD EE XISAABTA

# IS DIYAARINTA

## DIYAARINTA

### Qaybta 2aad: 10 Daqiiqo

Diyaarso kuraasi si ay waalidiintu u arki karaan shaashad, sabuurad cad, ama gidaar halkaas oo aad ku tusi doonto "Xisaabta Fudud" iyo fikradaha ka soo baxa wada-hadalka.

Haddii aad kulanka ku qabanaysaan si fool-ka-fool ah, diyaarso goobta adigoo qaybinaya kaararka daabacan ee “Xisaab Fudud” (adigoo isticmaalaya baaquli ama weel), afar kaar waalid kasta oo kasoo qayb gala. U oggolow waalidiintu inay doortaan afar kaar, ama si aan kala sooc lahayn ugu qaybi (waad nuqulan kartaa kaararka haddii loo baahdo iyadoo ku xiran tirada kooxda).

Haddii aad isticmaaleyso goob kulan oo dijitaal ah, la wadaag xiriiriyaha “Xisaab Fudud” bilowga fasalka si waalidiintu u eegaan qayb ka mid ah hawsha. Si waalidiinta loo siiyo waqti dheeraad ah oo ay ku akhriyaan “Xisaab Fudud”. U sheeg inay doortaan laba ka mid ah kuwa ay si gaar ah u jecel yihiin.

Hubi in dhammaan waalidiintu haystaan agabka loo baahan yahay (tusaale ahaan, kaararka “Xisaab Fudud” oo daabacan ama xiriiriye dijitaal ah).




Math & Numeracy Lab,
University of Minnesota
© 2025

CUNTOOYINKA FUDUD EE XISAABTA

# HAWLQABAD

## ISBARASHO

2 Daqiiqo

Soo bandhig hawsha. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa inaad dhahdid, **"Maanta waxaan ka hadli doonnaa sida loo doorto hawlo xisaabeed oo ka caawinaya ilmahaaga inuu barto xirfado cusub oo xisaabeed."**

## HAWL IYO FALANQAYN

**Qaybta 1aad**: 20-30 Daqiiqo

Ugu horreyn, la wadaag waalidiinta in carruurtu wax ugu badan ka bartaan hawlaha aan aad ugu fududayn ama aad ugu adkayn. Waxaad rabtaa in hawshu noqoto mid leh caqabad yar, si ay ugu guuleystaan dadaal yar iyo/ama caawimaad yar oo adiga kaa timaadda.

Aan ka fikirno xirfadaha xisaabeed ee ilmahaaga soo jiita, iyo sidaad u taageeri karto barashadiisa adigoo isticmaalaya hab ciyaar ah oo xiiso leh. Carruurta da'da barbaarinta intooda badan, tani waxay la macno tahay in la tixgeliyo erayada xisaabta ee hore iyo fikradaha fudud, halkii la siin lahaa xisaab dugsiyeed adag sida warqado shaqo iyo imtixaano wakhti leh. Waxaa laga yaabaa in hawsha aad siisay ilmahaagu ay tahay mid wax yar adag, laakiin isagoo helaaya tilmaamo ama caawimo yar oo kaa timaadda, wuu xallin karaa wuuna wax ka baran karaa.  Ama waxaa dhici karta in hawshu ay ilmahaaga u fududahay, taasna waa la aqbali karaa, maxaa yeelay ilmuhu wuu ka faa'iidaynayaa ku celcelinta. Xaaladdaas, waxaad markale dooran kartaa hawl wax yar ka duwan oo aad tijaabiso.

Carruurta yaryar waxay si fiican u bartaan xisaabta marka ay haystaan agab ay taaban karaan (tusaale ahaan, si ay u tiryaan ama u sameeyaan qaab), ama ay fiirin karaan (si ay u isbarbardhigaan cabbirka, ama uga hadlaan meelaha ay wax kaga yaallaan). Carruurtu waa in ay u arkaan hawsha ciyaar — ee aysan u arkin wax khasab ah oo ay u sameynayaan si ay kaa farxiyaan.

**Wada-hadal Koox Weyn**

U sheeg waalidiinta in ay dib u eegaan kaararka "Xisaab Fudud" ee ay haystaan, oo ay doortaan 1 ama 2 ay jecel yihiin ama ku habboon ilmahooda.

"Iiga warran kuwa 'Xisaab Fudud' ee aad u aragto inay ilmahaaga ku habboon yihiin. Maxaad u dooratay kuwaas?"

- Haddii aad joogtaan kulan fool-ka-fool ah, waalid kasta ha doorto 1 ama 2 ka mid ah 4 kaar ee uu haysto.
- Haddii kulanku yahay mid dijitaal ah, waalid kasta ha doorto 1 ama 2 kaar oo ka mid ah dhammaan kaararka la heli karo.


© 2025

CUNTOOYINKA FUDUD EE XISAABTA

# HAWLQABAD

## HAWL IYO FALANQAYN

**Qaybta 1aad**: 20-30 Daqiiqo

**Wada-sheekeysi laba-labo ah**

Ikhtiyaar kale waa inaad si aan kala sooc lahayn ugu qaybiso kaararka "Xisaab Fudud" (ama haddii la isticmaalayo bandhig dijitaal ah, si aan kala sooc lahayn u qoondee "Xisaab Fudud" waalidiinta). Ka dib, waalidiinta ha isu lammaaneeyaan (ama ku kala qaybso qolal dijitaal ah) si ay uga wada hadlaan heerka ay "Xisaab Fudud"-ka ay heleen ugu habboon yihiin heerka koritaan ee ilmahooda. Markaas ha ka fikiraan sida loo beddeli karo "Xisaab Fudud" aad ugu adag ama aad ugu fudud ilmahooda, si ay ugu noqoto mid wax yar ka adag — taasoo kor u qaadaysa fursadda waxbarasho.

"Kee ka mid ah 'Xisaab Fudud' ayaad beddeshay si aad ilmahaaga uga caawiso barashada xirfado xisaabeed oo cusub? Sideed u beddeshay?"
"Sideed ku ogaatay in 'Xisaab Fudud' uu ilmahaaga ku adkaa? Ka warran haddii uu aad ugu fududaa?

Ka dib markii ay waalidiintu si laba-labo ah uga wada hadlaan "Xisaab Fudud," ha la wadaagaan hal tusaale oo ah "Xisaab Fudud" oo ku habboon heerka koritaanka ilmahooda, iyo mid ay wax ka beddeleen, -iyagoo sharxaya sida ay u beddeleen. La qabsiga (isbeddelka waalidiintu ku sameeyeen hawl-qabadka) waxa laga yaabaa inay la xidhiidhaan heerka korriinka ilmahooda, ama waxay khuseeyaan danaha ilmaha, ama qiimaha qoyska.

Ka caawi waalidiinta inay arkaan marka isbeddelada hawsha lagu sameeyay ay noqdaan kuwo si fiican u xoojinaya barashada ilmaha — oo aan aad u adkeyn balse uu ilmuhu u baahan yahay taageero yar si uu u dhammeeyo hawsha. Tusaale ahaan, haddii ilmuhu ku guulaysan waayo isku dayga ugu horreeya, u sheeg inay caadi tahay inuu isku sii dayo. Hawsha weli way ku habboon tahay heerka horumarkiisa haddii ay weli xiiso leedahay oo aysan noqon mid si xad dhaaf ah u niyad jebinaysa.

Xusuusi waalidiinta in carruurtu inta badan yihiin kuwo xiiseeya waxbarashada oo adkaysi badan leh, iyo in barashadu si tartiib ah u socoto! Waxa maanta adag ama isku dayga ugu horreeya ku adkaada, berrito ama isku dayga xiga wuxuu noqon karaa caqabad xiiso leh oo ay fahmaan. Sidoo kale, xasuuso in barashadu u dhacdo si tallaabo-tallaabo ah — tusaale ahaan, ilmuhu wuxuu aqoonsan karaa saddex-xagal ka hor inta uusan sharxi karin astaamaha muhiimka ah ee saddex-xagalka (saddex geesood).


Math & Numeracy Lab,
University of Minnesota
© 2025



# CUNTOOYINKA FUDUD EE XISAABTA
# HAWLQABAD

## HAWL IYO FALANQAYN

**Qaybta 3aad**: 20-30 Daqiiqo

Ogaysii oo xooji tusaalooyin kasta oo ay bixiyaan waalidiinta kuwaas oo muujinaya waxbarasho cusub iyo adeegsiga xirfadaha xisaabta oo loo arko inay "aad ugu adag yihiin" carruurta. Cilmi-baadhistu waxay muujisay in dadka waaweyni ay inta badan dhayalsadaan xirfadaha xisaabta ee ilmuhu awoodo inuu ku barto da'da yar. Waalidiintu inta badan waxay bixiyaan fursado ka hooseeya kartida ilmaha iyo heerka xirfadeed ee waqti xaadirka ah. Si taas looga fogaado, xooji tusaale ahaan marka waalidiintu ay ka wada-hadlaan fikrado horumar ahaan ku habboon oo xoogaa la gaari karo, ama xoogaa caqabad ku ah ilmaha, si ay ugu noqoto fursad uu wax ugu barto.

Xooga saar oo ku adkee in shay u ekaan kara in yar “aad u adag” ilmaha uu weli yahay fursad waxbarasho. Tusaale ahaan, waxaad dhihi kartaa:

"Mararka qaar, waxaa laga yaabaa in eray ama fikrad ay u muuqan karto mid ku adag ilmahaaga, laakiin ilmahaagu adiga ayuu kaa baranayaa erayadaas iyo fikradahaas, xitaa haddii uusan isla markaasba soo celin karin."

"Midkee ka mid ah 'cuntooyinka fudud ee xisaabta' oo ahayd wax yar oo adag ayaad weli isticmaali lahayd si ilmahaagu ugu helo fursad uu si tartiib tartiib ah ugu barto erayo ama fikrado xisaabeed oo cusub?"

## XIRRITAANKA

5-10 Daqiiqo

Ku dar waxyaalahan muhiimka ah ee laga qaadanaayo kulanka marka aad soo xirayso wada hadalka waalidiinta. Waxaad ku sheegi kartaa si qoraal ah, ama u qeex si ku salaysan khibradaha waalidiinta:

- "Cuntooyinka fudud ee xisaabta” waa tusaalooyin fudud oo lagu dhiirrigeliyo hadalka ku saabsan xisaabta, kuwaas oo la dooran karo ama loo beddeli karo si ay ugu habboonaadaan heerarka kala duwan ee koritaanka ilmaha."
- Waa muhiim in waalidiintu tixgeliyaan sida ay hadalka xisaabta ugu isticmaali karaan si ku habboon heerka horumarka ilmahooda.

Si loo xoojiyo waxbarashada, weydii qoysaska inay kula qaybsadaan ama kula wadaagaan hal wax oo ay ka barteen xisaabta hore ee hawlqabadkan.


**Math & Numeracy Lab, University of Minnesota**
© 2025

# CUNTOOYINKA FUDUD EE XISAABTA
# ISBEDDELKA

## DA'DA ILMAHA

Tixgeli da'da carruurta qoysaska aad la shaqeyso. Haddii carruurtu aad u yar yihiin, sida da'doodu ka yar tahay 4 jir, ka fiirso sida loo aqoonsado tusaalooyinka korriinka ku habboon ee daryeel-bixiyeyaashu la wadaagi karaan, iyo sida kuwani uga duwanaan karaan carruurta waaweyn.

## WAQTIGA IYO AGABKA

Haddii aad haysato waqti xaddidan (kooban) oo aad la wadaagto hawsha waalidiinta, tixgeli in aad yareyso hawsha si aad diiradda u saarto da'da hal koox, ama kaliya labo ama saddex kaar oo "cuntooyinka fudud ee xisaabta" ah guud ahaan.

## TAAGEERADA WAALIDIINTA

Haddii waalidiinta aad la shaqeyso ay u baahan yihiin tixgelin dheeraad ah si ay uga qayb-qaataan, hubi inaad ku taageerto baahiyadooda sida:

- Usoo bandhig qoraal kooban
- Bixinta dhammaan agabka oo lagu qoray luqadda hooyo ee waalidiinta (oo leh tarjumaad marka ay khuseyso)
- Waalidiinta doorbidaya inay la falgalaan agabka iyagoo isticmaalaya habab kale oo aan ahayn wax-akhriska ama leh xirfadahooda akhris-qoris oo hooseeya, sii maqal (waxaad duubi kartaa faylal maqal ah ama kor u akhri agab) oo ka qayb-gal wada-hadal meeshii aad wax akhrin lahayd.




Math & Numeracy Lab,
University of Minnesota
© 2025

## CUNTOOYINKA FUDUD EE XISAABTA

# FAAHFAAHINTA WAALIDIINTA

## Marka Banaanka La Aado

Fikrado degdeg ah oo fudud oo lagu helayo loogana hadli karo xisaabta ku saabsan nolol maalmeedka qoyska




**Raadi Xisaabta:** Markaad socotid, baabuur wadid, ama gaadiidka dadweynaha ku jirto, fiiro gaar ah u yeelo qaababka iyo tirooyinka ku hareeraysan.
**Ka Hadal Xisaabta:** Waa maxay qaababka aad ku aragtay calaamadaha aan dhaafayno? Sidee baad ku ogaatay in tani tahay saddex-xagal? Waa maxay lambarka ku qoran taarikada gaarigaas?



**Raadi Xisaabta:** Markaad safka gasho si aad dukaanka uga baxdid, tiri dadka si aad u ogaato safka ugu gaaban.
**Ka Hadal Xisaabta:** Safkee ayaa ugu gaaban? Safkee ayaa dadka ugu badan? Sidee baad u ogtahay? Ma tirin kartaa dadka ku jira mid kasta?



**Raadi Xisaabta:** Tirso inta xabbo ee shay aad uga baahan tahay dukaanka.
**Ka Hadal Xisaabta:** Waxaan u baahan nahay afar tufaax. Ma ii tirin kartaa afar tufaax?Meeqo sanduuq oo cereal ah ayaan gaariga alaabta lagu qaato geliyey?



**Raadi Xisaabta:** Ku dar ama isbarbar dhig qiimaha dukaanka.
**Ka Hadal Xisaabta:** Haddii hal kartoon oo ukun ah uu qiimihiisu yahay $1, meeqo bay laba kartoon oo ukun ahi ku kacayaan?Cereal-kani(Badarkani) waxa uu qiimihiisu yahay ilaa $3 midna waa $4. Keebaa qiimihiisu badan yahay?

DREME | Development and Research in Early Mathematics Education

familymath.stanford.edu

Copyright © 2020 Stanford University, DREME Network. All Rights Reserved.

**HAWLQABAD 3.2**
**Math & Numeracy Lab, University of Minnesota**
© 2025

CUNTOOYINKA FUDUD EE XISAABTA

# FAAHFAAHINTA WAALIDIINTA

## Guriga Dhexdiisa

Fikrado degdeg ah oo fudud oo lagu helayo loogana hadli karo xisaabta ku saabsan nolol maalmeedka qoyska



**Raadi Xisaabta**:Markaad dhaqayso saxamuunta, u kala saar shayada wixii isku mid ah iyo kuwii kala duwan.
**Ka Hadal Xisaabta**:Ma samayn kartaa koox ka kooban dhammaan qaadooyinka nadiifta ah iyo dhammaan fargeetooyinka? saxamuuntan nadiifta ah kee baa loo baahan yahay in la galiyo armaajada jikada.



**Raadi Xisaabta**: Markaad xareynaysid adeegga aad soo iibsatay, ka fikir meesha ay alaabtu ku habboon tahay — armaajada ama faranjeerka.
**Ka Hadal Xisaabta**: Ma dhigi kartaa caanaha ukunta gadaasheeda? Sanduuqan bariiska ah ma geli karaa armaajadan mise wuu ka dheer yahay? Ma la dhigi doonaa hortiisa, gadaashiisa, mise korkiisa?




**Raadi Xisaabta**: Markaad xareynaysid adeegga aad soo gaday, ukala saar waxyaabaha is-leh iyo kuwa kala duwan
**Ka Hadal Xisaabta**: Ma heli kartaa dhammaan waxyaabaha u baahan in la geliyo faranjeerka? Ma awooddaa inaad hesho dhammaan daasadaha ama qasacadaha?



**Raadi Xisaabta**: Marka aad dhar dhaqeysid, ku kala saar dharka kuwa isku eg iyo kuwa kala duwan.
**Ka Hadal Xisaabta**: Ma iga caawin kartaa in aan dharka u kala saarno kuwa cad, kuwa madow, iyo kuwa midabyada isugu jira inta aynaan dhaqin.



**Raadi Xisaabta**: Marka aad weelasha iyo daboolkooda isku aadinaysid, ka fiirso qaabka iyo cabbirka.
**Ka Hadal Xisaabta**: Ma ii heli kartaa daboolka ku habboon weelkan? Xasuusnow inaad raadiso mid leh qaab iyo cabbir isku mid ah!



**Raadi Xisaabta**: Isticmaal ereyada sida gudaha, hoos, agagaarka, korka, iyo dhexdooda si aad u sharraxdo waxaad ka qabanayso jikada.
**Ka Hadal Xisaabta**: Ketchup-ka ma dhigi kartaa mustard-ka gadaashiisa?

DREME | DREME Horumarinta iyo Baarista Waxbarashada Xisaabta Hore.

familymath.stanford.edu

Copyright © 2020 Stanford University, DREME Network. All Rights Reserved.

**HAWLQABAD 3.2**

Math & Numeracy Lab, University of Minnesota
© 2025

# CUNTOOYINKA FUDUD EE XISAABTA

# FAAHFAAHINTA WAALIDIINTA

## Guriga Dhexdiisa

**Fikrado degdeg ah oo fudud oo lagu helayo loogana hadli karo xisaabta ku saabsan nolol maalmeedka qoyska**



**Raadi Xisaabta:** Marka aad labisaneysid, ka hadal cabbirrada, qaababka, iyo naqshadaha dharka.
**Ka Hadal Xisaabta:** Fiiri naqshadda ku jirta shaatigaaga! Waxay ku socotaa: xarriiq dhuuban oo buluug ah ka dibna xarriiq ballaaran oo cagaaran. Hadda, adigu i tus waxa xiga. Maxay kale oo aad aragtaa oo ah naqshado kale?



**Raadi Xisaabta:** Isticmaal erayo muujinaya waxa dhaca marka hore, labaad, iyo saddexaad si aad u muujiso in waxyaabaha ay dhacaan si nidaamsan.
**Ka Hadal Xisaabta:** Marka hore, u beddello dharkaaga hurdada. Marka labaad, cadeyso ilkahaaga. Marka saddexaad, waxaan wada akhrisan doonaa sheeko!




**Raadi Xisaabta:** Marka aad xarayneysid buugaagta iyo alaabta lagu ciyaaro, isticmaal erayo ka hadlaya meesha ay yaallaan, cabbirkooda, iyo qaabkooda.
**Ka Hadal Xisaabta:** Maku ridnaa buuggan armaajada kore mise ajmaada hoose? Buuggan leydiga ah ma geli doonaa weelka wareegsan?



**Raadi Xisaabta:** Marka aad xarayneysid buugaagta iyo alaabta lagu ciyaaro, isticmaal erayo ka hadlaya meesha ay yaallaan, cabbirkooda, iyo qaabkooda.
**Ka Hadal Xisaabta:** Maku ridnaa buuggan armaajada kore mise ajmaada hoose? Buuggan leydiga ah ma geli doonaa weelka wareegsan?

DREME

DREME Horumarinta iyo Baarista Waxbarashada Xisaabta Hore.

familymath.stanford.edu

Copyright © 2020 Stanford University, DREME Network. All Rights Reserved.

**HAWLQABAD 3.2**
**Math & Numeracy Lab, University of Minnesota**
© 2025

## CUNTOOYINKA FUDUD EE XISAABTA

# FAAHFAAHINTA WAALIDIINTA

## Waqtiga Ciyaarta

**Fikrado degdeg ah oo fudud oo lagu helayo loogana hadli karo xisaabta ku saabsan nolol maalmeedka qoyska**



**Raadi Xisaabta:** Marka aad joogtid beerta ciyaarta, isticmaal erayo sida kor, hoos, iyo dhexda si aad u sharraxdo waxaad aragtid.
**Ka Hadal Xisaabta:** Xayawaan noocee ah ayaad ku aragtaa kursiga hoostiisa? Ma jiraan xayawaano saaran geedka korkiisa? Ma jiraan kuraas kuyaal geedaha dhexdooda?



**Raadi Xisaabta:** Isticmaal ereyada cabbirka iyo tirada si aad uga hadasho waxyaabo laga heli karo gurigaaga agagaarkiisa. Tusaale ahaan: ugu weyn, ugu badan, qaar, dheer, gaaban.
**Ka Hadal Xisaabta:** Xayawaanka cufan kee ugu weyn? Koobkaaga ma buuxa mise wuu eber oo ma buuxo? Ma leedahay boombale madaxkuti oo badan mise waxaad leedahay boombale lo'o badan?



**Raadi Xisaabta:** Markaad ciyaaraysid iska-yeel, ogow oo ka hadal tusaalooyinka tirooyinka.
**Ka Hadal Xisaabta:** Meeqo qof ayaa jooga xafladeena shaaha oo dhan? Haddii aan qof walba u siinayno laba buskud, meeqo buskud ayaan u baahan doontaa dhammaan?



**Raadi Xisaabta:** Marka uu ilmahaagu wax sawirayo, u fiirso oo is bar-bardhig cabbirraada kala duwan.
**Ka Hadal Xisaabta:** Waa maxay shayga ugu weyn sawirkaaga? Waa maxay shayga ugu yar? Faraskaasi wuxuu u egyahay mid aad ku dheer markuu ku xigo eeyga gaaban?

DREME

DREME Horumarinta iyo Baarista Waxbarashada Xisaabta Hore.

familymath.stanford.edu

Copyright © 2020 Stanford University, DREME Network. All Rights Reserved.

**HAWLQABAD 3.2**
**Math & Numeracy Lab, University of Minnesota**
© 2025

# CUNTOOYINKA FUDUD EE XISAABTA

# FAAHFAAHINTA WAALIDIINTA

## Waqtiga Ciyaarta

Fikrado degdeg ah oo fudud oo lagu helayo loogana hadli karo xisaabta ku saabsan nolol maalmeedka qoyska



**Raadi Xisaabta:** Markaad joogtid meesha lagu ciyaaro, raadi oo ka hadal qaababka.
**Ka Hadal Xisaabta:** Qaab noocee ah ayuu u furan yahay meesha la iska soo sibiibixiyo? Ma heli kartaa goobo kale? Ma heli kartaa qaab leh afar dhinac ama afar gees?



**Raadi Xisaabta:** Markaad samayneysid xujooyinka, sharax qaabka qeybaha xujooyinka si ay kaaga caawiyaan in la ogaado sida loo sameeyo ama ay isku qaataan qeybahaasi.
**Ka Hadal Xisaabta:** Bal fiiri dhinacan fidsan ama siman? Taasi waxay la macno tahay in tani ay ku socoto cidhifkaee xujooyinka. Sidee ayaad ugu hagaajin kartaa dhinacan fidsan ee qaybtaan midka siman ee qaybta kale?



**Raadi Xisaabta:** Markaad daaqadaada wax ka fiirinaysid, ka hadal cabbirka iyo meelaha ay ku yaalaan waxaad aragtid?
**Ka Hadal Xisaabta:** Waa maxay dhismaha ugu dheer ee aad aragto? Daaqaddee ayaa ugu weyn? Maxaa ka gaaban tiirka nalka iftiimaaya?



**Raadi Xisaabta:** Gurigaaga dhexdiisa ka raadi tusaalooyin qaabab kala duwan ah.
**Ka Hadal Xisaabta:** Waa maxay qaabka baastadan? Waa maxay qaabka buuggan? Ma heli kartaa shay kale oo la mid ah buugga?



**Raadi Xisaabta:** Markaad joogtid meesha ama goobta ciyaarta, isticmaal erayada sida qalloocsan, hooska, iyo inta u dhaxaysa si aad uga hadasho waxaad aragto.
**Ka Hadal Xisaabta:** Meesha lagu sibiibixdo ma tahay mid qalloocan mise waa mid toosan? Ma u malaynaysaa inaad geli kartid buundada hoosteeda?

DREME | DREME Horumarinta iyo Baarista Waxbarashada Xisaabta Hore.

familymath.stanford.edu

Copyright © 2020 Stanford University, DREME Network. All Rights Reserved.

**HAWLQABAD 3.2**
**Math & Numeracy Lab, University of Minnesota**
© 2025

# CUNTOOYINKA FUDUD EE XISAABTA
# FAAHFAAHINTA WAALIDIINTA

## Waqtiga Ciyaarta

**Fikrado degdeg ah oo fudud oo lagu helayo loogana hadli karo xisaabta ku saabsan nolol maalmeedka qoyska**




**Raadi Xisaabta:** Ka hadal cabbirka iyo tirada xayawaanka ee beerta xayawaanka ama sawirrada iyo buuggaagta.
**Ka Hadal Xisaabta:** Kee baa weyn, hooyoda haramcasta mise ilmaheeda? Meeqo cunug oo yar-yar oo haramcasta ayaad aragtaa?



**Raadi Xisaabta:** Markaad joogtid meesha ama goobta ciyaarta, raadi oo ka hadal wax la tirin karo?
**Ka Hadal Xisaabta:** Meeqo tillaabo ayay kugu qaadanaysaa inaad ka gudubto buundada? Ma jiraan biraha badan oo la iska laalaadiyo ama wiifow badan? Sidee baad ku garanaysaa?



**Raadi Xisaabta:** Markaad joogto beerta, raadi waxyaabo la tirin karo oo is barbar dhig tiradooda.
**Ka Hadal Xisaabta:** Meeqo kursi ayaa meeshaas yaalla? Meeqo geedo ayaa meeshaas ku yaalla? Ma geedaha ayaa badan mise kuraasta?



**Raadi Xisaabta:** Markaad wax ku dhisayso alaabta carruurtu ku ciyaarto ama baloogyada, raadi siyaabooyin aad isku barbar dhigto cabbiraada.
**Ka Hadal Xisaabta:** Munaaraddee ugu dheer? Ma sameyn kartaa laba munaarad oo isku dherar ah? Baloogyadee kaa caawin kara inay munaaradaadu dheeraato?



**Raadi Xisaabta:** Ciyaar ciyaarta qiyaasida qaabka adigoo sharaxaya qaabka adigoon isticmaalin magaciisa.
**Ka Hadal Xisaabta:** Qeex qaab adoon isticmaalin magaciisa. Waxaan ka fekerayaa qaab leh saddex gees. Waa maxay qaabka aan ka fekerayo?

DREME Horumarinta iyo Baarista Waxbarashada Xisaabta Hore.

familymath.stanford.edu


Copyright © 2020 Stanford University, DREME Network. All Rights Reserved.


**HAWLQABAD 3.2**
Math & Numeracy Lab, University of Minnesota

© 2025

# CUNTOOYINKA FUDUD EE XISAABTA
# FAAHFAAHINTA WAALIDIINTA

## Waqtiga Diyaarinta Cuntada

Fikrado degdeg ah oo fudud oo lagu helayo loogana hadli karo xisaabta ku saabsan nolol maalmeedka qoyska



**Raadi Xisaabta:** Markaad raacayso habka cunto karinta, tiri inta shay aad u baahan tahay si aad cuntadaas u karisid.
**Ka Hadal Xisaabta:** Waxaan u baahanahay saddex ukun. Ma ii keeni kartaa saddex ukun? Qof kasta oo qoyska ka mid ah wuxuu u baahan yahay doolshaha yaryar. Meeqo doolshe oo yaryar ayaan u baahan nahay?



**Raadi Xisaabta:** Markaad wax karinayso, isticmaal qalabka cabbiraadda si aad u diyaariso cuntada.
**Ka Hadal Xisaabta:** Waxaan u baahanahay laba koob oo farmaajo la jarjaray. Ma iga caawin kartaa inaan ku shubo farmaajada koobka cabiraada? Waxaan u baahanahay laba qaado-yar oo vanilla ah. Tiri inta jeer aan buuxiyo qaadoda-yar.



**Raadi Xisaabta:** Markaad miiska diyaarinayso,, ururi macluumaad oo go'aan gaar.
**Ka Hadal Xisaabta:** Ma soo ogaan kartaa qof walba waxa uu rabbo inuu cabo? Aynu tirino inta qof ee rabta caano iyo iyo inta dad ee rabta biyo.



**Raadi Xisaabta:** Markaad cuntada qaybineysid, ka fikir sida qof walba uu u heli karo qayb isku mid ah.
**Ka Hadal Xisaabta:** Waxaan haynaa sagaal empanadas iyo saddex qof. Mid walba meeqo xabo ayuu helayaa si ay caddaalad u noqoto?



**Raadi Xisaabta:** Markaad miiska diyaarinaysid,  tirso si aad u aragtid inta shay ee loo baahan yahay oo sharax meesha la dhigayo.
**Ka Hadal Xisaabta:** Meeqo saxan ayaa loo baahan yahay qof kasta oo wax cunaaya? Ma dhigi kartaa fargeeto hal dhinac saxanka iyo qaado dhinaca kale? Ma dhigtaa tuwaal  fargeetada hoosteeda?

DREME Horumarinta iyo Baarista Waxbarashada Xisaabta Hore.

familymath.stanford.edu

Copyright © 2020 Stanford University, DREME Network. All Rights Reserved.

**HAWLQABAD 3.2**
**Math & Numeracy Lab, University of Minnesota**
© 2025

## CUNTOOYINKA FUDUD EE XISAABTA

# FAAHFAAHINTA WAALIDIINTA

## Waqtiga Sheekada

Fikrado degdeg ah oo fudud oo lagu helayo loogana hadli karo xisaabta ku saabsan nolol maalmeedka qoyska



**Raadi Xisaabta:** Markaad buuggaag akhrinaysid, ogow oo ka hadal tusaalooyinka cabbirka kala duwan ee sawiradda buugga ku jira.
**Ka Hadal Xisaabta:** Kee baa dheer, ka gaaban, ka dhuuban, iwm? Sidee baad ku garanaysaa? Ma ka fikiri kartaa xataa wax intaan ka dheer, ka gaaban, ka dhuuban?



**Raadi Xisaabta:** Markaad buugaag akhrinayso, ogaysii oo ka hadal tusaalooyinka qaababka sawiradda.
**Ka Hadal Xisaabta:** Qaabkee buu kani yahay? Sidee baad ku ogaatay? Meeqo gees ayuu leeyahay? Sidee ayuu uga duwan yahay ama ugu egyahay qaabkan kale?




**Raadi Xisaabta:** Markaad buuggaga akhrinayso, tiri inta shay ee sawiradda ku jira.
**Ka Hadal Xisaabta:** Meeqo ubax ayaad u jeedaa ama aragtaa? Meeqo waaye marka kuligood la isku daro? Ma heli kartaa tiradaas bogga ku qoran?

DREME Horumarinta iyo Baarista Waxbarashada Xisaabta Hore.

familymath.stanford.edu

Copyright © 2020 Stanford University, DREME Network. All Rights Reserved.

**HAWLQABAD 3.2**
**Math & Numeracy Lab, University of Minnesota**
© 2025

HAWLAHA LOOGU TALAGALAY XIRFADLAYAASHA TAAGEERADA QOYSKA:

# Sahaminta Xisaabta Hore

"Habka Xisaabinta" waxaa loo sameeyay Xirfadlayaasha Taageerada Qoyska si ay ula adeegsadaan qoysaska ay u adeegaan. Dhammaan waxqabadyada waxaa lagu heli karaa lacag la'aan, gudaha machadka Xisaabta Horumarinta Ilmaha iyo website-ka Tirooyinka, si gaar ah loogu isticmaalo qoysaska iyo waalidiinta. Qalabkan ayaa laga yaabaa maaha in dib loo soo saaro ama loo qaybiyo mid kasta oo loogu talagalay dadaalka faa'iidada iyada oo aan oggolaansho cad laga helin horumarinta hogaanka, Drs. Wackerle-Hollman iyo Mazzocco.

**Cutub 1: Sida Fikirka iyo Dabeecadaha ay u Saameyn karaan Xisaabta Hore**

Hawlqabad 1.1 Qof Walba Wuu Guulaysan
Hawlqabad 1.2 Aragtii Cusub
Hawlqabad 1.3 Habka Xisaabinta
Hawlqabad 1.4 Ka Barashada Khaladaadaha Xisaabta
Hawlqabad 1.5 Fikrado, Su'aalo, iyo Wada-Hadal
Hawlqabad 1.6 Hagaajinta Hab-Dhaqanka
Hawlqabad 1.7 Waxaan Nahay Dhamman Dad Xisaabed

**Cutub 2: Xisaabtu waa tirooyinka iyo in ka badan: Sahaminta Mawduucyada Xisaabta Hore**

Hawlqabad 2.1 Kaleidoscope Xisaabta
Hawlqabad 2.2 Mawduucyada Xisaabta Hore
Hawlqabad 2.3 Sawirka Xisaabta
Hawlqabad 2.4 Kor U Qaadis!
Hawlqabad 2.5 Barashada Socod Baradka

**Cutub 3: Helitaanka Xisaabta ee Nolosha Maalinlaha ah**

Hawlqabad 3.1 Sheekooyinka Guusha Xisaabta Hore
Hawlqabad 3.2 Cuntooyinka Fudud Ee Xisaabta
Hawlqabad 3.3 Raadinta Xisaabta Qarsoon
Hawlqabad 3.4 Xisaab Ku Muuji Fikirkaaga
Hawlqabad 3.5 Ficilka Xisaab Maalmeedka
Hawlqabad 3.6 Jadwal Maalinle ah oo Fudud

Hawlahan waxaa soo saaray Shaybaarka Xisaabta iyo Tirooyinka, oo uu hogaaminayso Michèle Mazzocco, Machadka Horumarinta Carruurta (ICD), iyada oo la shaqaynaysa waa Alisha Wackerle-Hollman, Agaasimaha IGDI Shaybaarka, Waaxda Cilmi-nafsiga Waxbarashada, labadaba Jaamacadda Minnesota. Wax ku darsaday waxaa ka mid ah ardayda dhaktornimo ICD Sarah E. Pan, MA, iyo Jasmine R. Ernst. Shaqadan waxaa taageeray Heising-Simons Foundation DREME Network Awards 2018-0670 iyo 2020-1777. Waxaan u mahadcelineynaa Shaybaadhka Xisaabta iyo Tirooyinka ee gacan ka geystay shaqadan, Xirfadlayaasha taageerada qoyska kuwaas oo bixiyay jawaab celin ama nagu soo dhaweeyay (iyo hawlaheenna) fasalladooda, iyo la-taliyeyaasha jaalkayaga bulshada kuwaas oo bixiyay fikrado ku saabsan xulashada luqadda oo keenay sawirro si ay shaqadani uga dhigto mid macno leh beelaha Laatiinka iyo Soomaalida.

UNIVERSITY OF MINNESOTA MNL MATH & NUMERACY LAB

© 2025

IGDILAB